JOB INTERVIEW

WAREYSIGA

SHAQADA



- SIDA LOOGA JAWAABO SU'AALAHA WAREYSIGA SHAQADA
- U DIYAAR GAROWGA WAREYSIGA SHAQADA
- NOCYADA WAREYSIGA SHAQADA U KALA BAXO

QORE: SAYID AXMED XAJI MAXAMUUD TEL: 0618390797

Wareysiga Shaqada

Tusmada buuga

Waa maxay wareysi?…….. 7

Xirfadaha wareysiga…….……8

Qaladaadka wareysiga……..14

Noocyada wareysiga…….. 15

Ilaha wareysiga.……16

Bal naf sadaada kawaran?……..17

Maxaa shaqo la'aan u tahay?……18

Sababta aan kuu shaqaaleysiineyna maxey taahy? 19

Maxaad ka taqaanaa shaqada aan Rabno?.....20

Maxaad ku liidataa? ……..21

Maxaad ku awood badan tahay?..... 22

Maxaad tiigsani 2 da sane ee soo socdo? ……..23

Maxaad awoodaa wax shaqada ka baxsan?.....25

Maxaad Talo oo aad noo reebeysaa?.....26

Maxaad ka rabtaa shaqadaan?.....27

Maxaad ka ogtahay xog ku saabsan shirkadda?..28

Maxaad qabataa Waqtiyada fassaxa?.....29

Jagada aad u tartameysid intee aqoon ayaad

U ledahay?……30

Maxey tahay awooda xirfadeed aad leedahay?..31

Mushaar meeqo ayaad rabtaa?.....32

Maxad sameysaa marka ay ku qabato wal wal 33?

Noo sheeg caqabadaha waqtiga shaqada lagu jira? 34

Maxaad sameysaa marka ay ku qabato farxad?..35

Habeenkii meeqo saac ayaad huradaa?.....36

Bal wax nooga sheeg waxa ku qoran siifiigaada?37

Siifiigaada meeqa ayuu ka kooban yahay?..... 38

Diyaar garowga wareysiga……. 40

Bilaabista shaqada cusub…….41

Sida looga bad baado wareysi shaqo……42

Wareysiga Shaqada waa Dhankee?.....43

Wareysiga Shaqada Soomaalia……44

Wareysiyada Shaqada Aduunka……45

Shaqo Raadin……..46

Shuruudaha Wareysiga Shaqada……47

Meeshi Aad kasoo tagtay wax isku dhac miyaa ooga soo tagtay?.....48

Deegaankee Jaceshahay inaad ku Shaqeyso?..... 49

Noocee Maamulidaada?.....50

Hadii Aad Noqon laheyd Xayawaan kee Jeclaan laheyd inaad noqoto?.....51

Qorsho Majiraa ay leeyihiin caruurtaada?.....52

Maxaad Dareentaa Shaqada Habeenka?.....53

Shaqadaan Tababbar Nocee aad ka rajeynaysa?.54

Noo Sheeg Shaqada Aad ku riyoon jirtay?.....55

Shaqadaan Cusub Maxaad Karabtaa?.....56

Gabagabo Wareysiga Shaqada……57

Maxaa Kaa dhigi karo inaad Si adag u shaqeyso?58

Maxaa Dhiira geliyo Naftaada?.....59

Wax Nooga Sheeg Dabeecadaada?.....60

MeeqA Ayaa Kula Dhalatay?.....61

Meeqa Xaas Ayaad Guursan doontaa?.....62

Meeqa Sano Ayad ku Dhax jirtaa Waxbrashada?63

Aduunyada Maxaad kusoo Kordhini?.....64

Dhaqanka Shaqada Xafiiskaad Jaceshahay waa kee?.....65

Maxaa Kuxiga Wareysigga Shaqada?.....66

Dadka Adiga Maxey Kugu tilmaamaan?.....67

Goormee Shaqadaan Soo galeysaa?.....68

Shaqadaan intee Kasoo heshay?.....69

Maxaad u gali wareysiga?.....70

Dardaaran (Qoraaga Casrigaan)……..…71

Baro Waxyaalaha la xiriira Arimaha Shaqada……72

Qorista Warqadaha Codsiga Shaqada…… 74

Mahadnaq

1: Waalidkeyga……

2: Ustaadkeyga Maxamed Abukar Maxamed…..

Horudhac

Buugaan magaciisu waa (Wareysiga shaqada) Waxaana ugu bixiyey magacaas, markii aan arkey dhalinyaro shaqa doon ah, oo iweydiinayo, habka looga bad baado wareysiga, maadaamaa aniga aan bartay wax ku saabsan arimaha shaqada iyo shaqaalaha, kadib waxaan hindisay magaca buuggaan, Ugu danbeyn si ay u helaan dadka shaqa raadiska ama shaqa doonka ah macluumaad ku saabsan waqtiga wareysiga,

Aqriste: waxaan kuu rajeynaa in aad ku guuleysan doonto wareysiga shaqada, waa hadii Aad Aqrisata buuggaan, maxaa yeelay buuggaan oo aad u yar aana lagu soo koobi Karin arimaha ku saabsan wareysiga balse buuggaan waxaa ku jira micno aad u weyn , aqoon ku dheehan waayo aragnimo runtii.

Waxaan aad u jeclaan lahaa qof walbo oo daneynayo buuggaan in uu ku aqriyo maskax degan, si uu u fahmo nuxurka buugga kusaabsan, Maadaamaa buggaan uu yahay buug ka hadlayo habka casriga wareysiga loo qaado.

F.G: Qofkii talo iyo tusaale ii hayo, ama iigu soo hambalyeynayo howsha aan qabtay, wuxuu igala soo xiriiri karaa tel: 0618390797/0612745238 ama Sayidaxmed4@gmail.com

Waa maxay wareysi?

Wareysigu waa wada sheekeysi dhaxmarta labo qof ama koox ,Tusaale: su'aal ayaa lagu weydiinaa waad ka jawaabi Hadaba, sidaas waayo wareysi hadaad maqasho, Sidoo kale, erayga wareysi wuxuu sheegaa qof ku dhaqmayo xeerka wareysiga oo midka lawareysanaayo, sidoo kale, midka wax wareysanaayo asagana waa in uu ku dhaqmaa xeerka mid wax wareyste, tusaale:

qofka wax wareysanaayo su'aal buu weydiina midka la wareystaha, sidoo kale, midka la wareysanaayana jawaabo ayuu bixinaa, Hadaba Aqriste wareysigu sidiisaba wuxuu beegsadaa in xog la gud biyo kana imaado midka la wareysanaayo, ayna u gudubto midka wax wareysanaayo.



Xirfadaha wareysiga

Qodobka 1: Shaqa raadiyaha waa in uu o gaado waxa looga baahan yahay shaqadiisa, tusaale: waa in uu ogaado shaqada waxa ay u baahan tahay, adiga waxa lagaa rabo ,iyo taariiqda la aas aasay shirkadda aad shaqada ka dooneysa , tusaale, aan ka bixiyo si aan kugu jilciya, waa in aad garaneysa shirkadaan waxa ay daneysa badanaa, waxa ay soo qabatay hada ka hor iyo sanadka la' aas aasay, sidoo kale, aqriste waa in aad raadisaa shirkada aad u socota qorsha heeda, waa in aad gelisaa googlaha ,si aad wax oga ogaato shirkadaas.

Qodobka 2 aad: waa in aad u diyaar garowdaa su' aalaha lagu weydiini doona, macnaha waa in aad ogaata su'aalaha aad maleyneyso, in lagu weydiin doona.

Aqriste: su'aalaha dadka kuweydiin doona, waxey noqon karaan in ay kugu weydiiyaan hal qof ama koox, mar walbana waxaad la socotaa waxa aad ka jawaabeyso in la qorayo. Sababtoo ah, midka wax ku weydiinaayo waxaa

Daba fadhiya qof qorayo, waxa aad ku dhawaaqdo.

Qodobka 3 xaad: Waa in aad iska dhistaa labiska ama istaylka hadii aad tahay wiil ama gabadh


Waxaad eegtaa labiska shaqaalaha ay xirtaan iyo dhaqanka u yaalo shirkadaas, Aqriste: waxaad ogaataa wax walbo oo labis ah, ugu horeeyo, dharka aad xiran, iyo qurux diisa marka, hadii gabadh aad tahay waa in aad iska yareesaa dahabka, waayo, lama ogala dahab badan, hadii wiil aad tahay sigaarka waa in aad cabin, waayo, waxaa laga yaabaa in ay xaraarada ay ku gu kacdo, kadibna aad shidata sigaarka, taasina waa mamnuuc .

Sidoo kale, waa in aad wax soo cuntaa inta aan lagu wareysan, sabab too ah, wareysigu uma fiicno calool gaajeysan, Waxaa lagaa rabaa in aad soo cadayato ilkaha hadaba Aqriste, waxaad ogaatay wax yaalaha lagaa rabo waa inaad sii raadisaa faah faahin dheeri ah oo ku saabsan wareysiga lagaa doonaayo, hadii aad tahay nin ama dumar, waxaad googal gareeysaa Cinwaankaan,When Job-Hunting, Dress for Success.








Sunglasses on head
Poorly groomed
No tie
Baggy jacket





dharkaan waa dharka muslimka, hadii aad tahay gabadh muslimad ah waa in aad muujisaa dharka la guugu tala galay

Qodobka 4 aad: waa in aad ilaa lisaa waqtiga lagu balamiyey, sidoo kale, waa in aad imaadaa goobta wareysiga 15 daqiiqo ka hor, maalintaas ka hor waa in aad soo koobiyeesaa Codsigaada iyo shahaadadaada.

Waa in aad soo qaadataa qalin, iyo Warqad aad ku qorata Waxa lagu weydiinaayo.

Xusuusnow: in aad damiso lambarkaada, Xanjo lama ogala, Bal googal gareey Xogtaan si aad u ogaato macluumaad badan.

-Hour Countdown to the Job Interview.

Qodobka 5 aad: Waa in aad la imaadaa Asluub wanaag inta lagu dhex jiro wareysiga, waa in aad salaanto qofka ku wareysanaayo, marka aad la kulanto, hadii aad tahay wiil, waxa aad salaameysana uu yahay wiil, waa in aad la timaado, qoor qooreysi, hadii gabar aad salaameysana La imaad salaan soo jiidasho leh, Hagaag: Hadii aad tahay gabadh waxa aad salaameysana uu yahay Nin, la imaad salaan soo jiidasho leh, balse waxa aad salameysa hadey tahay naag, waa in aad gelisaa xabadka ,waliba si naxariis leh ugu qaad xabadka.

Sidoo kale, salaamtu waa in aad u istaagtaa, aad u dhoola cadeysaa ,in dhahaadana aad la fiirisaa asaga/ayada muuqaalkeeda/muuqaalkiisa.

Qodobka 5 aad: Marka lagu wareysanaayo waa in aad dhaqaajisaa jirkaada, gaar ahaan gacmaha ,markii aad jawaabeyso su;aasha lagu weydiiyey lama ogala gacmaha in aad isa saarto, sida adigoo salad tukanaayo

Gacmo dhaqaajintu waxaa lasocda dhoola cadeen, indha haada waa in aad ku fiirisaa midka ku wareysanaayo, Dhageysiga su'aasha waa lama huraan, Gacanta adeegsigeeda waxaa kamid ah, in aad is ticmaasho qalin, Taabashada wajigaada ,kursiga aad ku fadhido iyo wixii la xiriira, kaas oo keenayo gacan dhaqaajin, sidoo kale: waxaad baartaa qodobkaan waliba sidaan u googal gareey.

The Unspoken Secrets of Job Interviewing.

Gacan adeegsigu waa in uu noqdaa mid ay badanaa bani aadamku ay isticmaalaan, Sidoo kale waxaa jirta gacanta mid la isku caayo oo biryahaan soo if baxday, waa in aad iska ilaalisaa, hadii wareysi aad ku dhex jirto, maxaa yeelay, taasi saameen ayey kugu yeelan kartaa mudane,

Dad badan ayaa u dhashay in ay gacan tooda dhaqaajiyaan marka ay hadlayaan, Allah subxaanah wata caalaa ayaa ku abuuray, marka qofkii saas ah waa u dhacatay.

Qaladaadka wareysiga

1: Qofka la wareesanaayo waa in uu san aqoon u laheen kambaniga.

2: Teli garaanka oo kuu soo dhaco.

3: Weydiin mishaarka lugu siin doono, markii hore ayaaba aheyd qof la tacaalsan shaqala'aan.

4: Xanjo ruugid.

5: Kaftan badan iyo qosol badan.

6: Soo daahid waqtigii lagu balamiyey.

7: Su'aalaha in aad uga jawaabin si dhameystiran.

8: Meelaha muhiimka su'aalaha lagaa weydiiya ma faah faahineysid.

9: Su'aal weydiin qofka ku wareysanaayo, waliba su'aal aan habooneen.


10: in aad naxdid, marka su'aal lagu weydiiyo aad jareysid.

Noocyada wareysiga

1: wareysi telegaran: inta aan lagu casuumin ka hor ayaa lagu wareysanaa si, loo helo xog ama wax adiga kugu saabsan, maxaa yeelay wicitaan kaas oo telegaranka waxey suurta gelin in lagaa helo xog badan, lkn midka casuumaada ee wareysiga asaga waad u soo diyaar garowbi, ugu dambeyntii waxaa lagaa rabaa in aad ka jawaabto su'aal walbo oo lagu weydiiyo, marka dadka qaar isku mid ma'aha, dad waxaa u fiican wareysi casuumaad, dadna waxaa u fiican wareysi telegaran.

2: Wareysi labaad waa mid ka ag dhaw kii hore balse waa dadbadan oo la wareysanayo, waliba wareysanaa gadoomiyaha marka nooca wareysigaan waa mid caan ka ah dadweynaha.

3: Wareysi waji ka waji: kani waa kulan u dhexeeya midka la wareysanaayo iyo xubnaha shaqaalaha ka tirsan.



I laha wareysiga laga helo

Hadii aad rabto in aad hesho macluumaad badan oo kusaaabsan wareysiga shaqada, waxaad ka heli kartaa weybseyd yadaasn soo socdo.

1: www.ul.ie/careers

2: www.gradireland.com

3: www.careers4graduates.org

4: www.doctorjob.com(Virtual *Interview)*

5: www.prospects.ac.uk

6: www.realworldmagazine.com

7: www.windmillsprogramme.com

8: www.bbc.co.uk/radio1/onelife/work

Aqriste ku waan waa qeyb kamid ah aad ka heli karto macluumaad badan (Msaskaxdaada kobci)

Naf sadaada bal kawarn?

Hadii lagu weydiiyo Akhbaar ku saabsan nafsadaada ha u bixin taariiq nolaleed kaada oo ku qoran C.Vgaada, balse waxaad sheegtaa hadal macno leh oona kooban, ugu badnaan hadalkaas waa in uu socdaa labo daqiiqo, ugu yaraana waa in uu socdaa hal daqiiqo, hagaag waxaad beegsan Wax faa'ido u leh shirkadda ama ha'yada aad shaqada ka doonaneysid.

Tusaale: Waxaad orani, aniga sideedaba waxaan ku fiicanahay wax soo saarka meesha aan ka shaqeynayo, taasina waa mid xaqiiqo ah, sidoo kale waxaa la igaga dambeyaa kobaca shirkada aan jooga, maxaa yeelay aniga waxaan ahay qof hal abuur leh waxna hindisa oona hormariya meesha uu jooga kana muuqda bulshada dhaxdeeda, Aduunyada aad arkeyso waxaa hormarkaas gaarsiiyey dad ani ila mid ah oo sida aan ugu han weynahay meesha aan jooga iney la mid noqoto dadyowga caalamka ama shirkadaha aduunka horumaray, arintaas waxaad ka ogaan doontaa marka la ii fasaxo in aan shaqeeyo.

Hadaba aqriste, sidaas oo kale baad u sharrixi nafsadaada, hadii kale, gaariga waad ka dhici.

Maxad la tahay shaqo la'aan?

Waxaad ku jawaabi adigoo soo gaabinaayo warbixinta,aniga sideedaba waxaan inta badan ku mashquuliyey nafsadeyda waxbarasho tayo u leh dadka aan u shaqeyn doona,sidoo kale, waxaana si mutadhawic nimo ah in aan dadka ugu shaqeeyo ayaan doorbiday si, aan u kasbado aqoon badan oo aan haysanin, marka in aad gasho adiga oo xirfad badan ama qibrad badan u laheyn wax aad ku soo kordhini malaha shirkada ama ha'yada aad u shaqeyn doonta, sidoo kale shaqaduna waxaa ka jira tartan aad u xoog badan oo la is weydiin doono qofka khibradiisa inta ay la eg tahay, Tusaale: waxaa lagu dhihi karaa, maxaa heysataa oo shahaadooyin sareeya ah.

Jawaabtu: adigoon ka fiirinaynin wax yaalaha ay shuruudh uga dhigeen qofka ka shaqeynaya oo aadan u sheegaynin wax ka sareeya waxa ayagu soo ban dhigeen, balse waxaad ku jawaabi hadal wax tar u leh dadka ku wareysanaayo, waliba adigoo la kaashanaayo qibradaada waayo aragnimo ama caqligaada, maxaa yeelay cilmigaada wuxuu la dhan yahay inta caqligaada uu la dhan yahay, waa, tan ay Ku maah maaheens dadkeena soomaaliyeed(Cilmiga baro Caqligaadana la kaasho)

Sababta aan kuu shaqaaley siinayna maxey tahay?

Aqriste: waxaad sameysaa markii lagu weydiiyo su'aashaan waxaad u furtaa dhagahaada,maskaxdaada, qalbigaadana bal siiy dadka ku wareysanayo, adigoo digtoonow ku jiro , kadib waxaad dhihi adigoo ku laaf yoonayo jawaabta, aniga waxaan ahay qof aqoon u leh shaqadaan waliba kasoo bixi karo waxa la ifaro, mararka qaar waxey ku dhihi karaan waan ognahay in aad aqoon lee dahay balse maxaan fa'ido kugu qabnaa bal noo sharax arintaas,Aqriste, waxaad la kaashani caqligaada maxaa yeelay caqligu sidiisaba waxa meesha taagan waa u fudud yahay in uu ka jawaabo, laakiin ha isku noqon qof hada ka hor la weydiiyey cinwaankaan noo qoran, wuxuuna ugu jawaabay aniga waxaad ii shaqaaley siinaysiin in aan hunguri idinka helo macnaha in aad isiisaan mishaar anigana aan idin shaqeeyo.

Aqriste: jawaabta uu bixiyey qofkaan ma'aha jawaab ku haboon meesha uu jooga, Hadaba hadey saas tahay arintu shaqo waligaa ma heleysid, adiga iyo ciyaal xaafada waa isla joogeysiin waligiin, waxaad ka mid noqoni dadka la yiraahdo (Hooyo Canjeero isii}Dadkaan waa dad aan ku fakirin in ay shaqeystaan oona bartay in wax ka sugaan waalidiin tooda, taasina waa ayaan daro, maxaa yeelay mustaqbalkaada ayaa mugdi weyn galay, qofku markuu weynaado waxaa fiican in uu gooni u baxo, Aqriste, markaas qof magac leh ayad Tahay.

Maxaad ka taqaantaa shaqada aan rabno?

Ina, aabow su'aashaan waa su'aal muhiim ah dhagaha fur badanaa dadka la wareysta waa ay la kulmaan su;aashaan, Hasa ahaatee: qoraaga buugga ayaa kaa shaafinaayo.

Jawabtu: Mar walbo waxaad ogaataa inta wareysiga aad soo gelin macluumaadka ku saabsan shaqadaan waxaana ka ogaan webseytkii aad ka soo heshay warbixinta shaqada ama waxaad weydiini dad kasoo shaqeey shaqadaan oo kale ama waxaad weydiin shaqaalaha ha'yadaan lagaa wareysanayo, hadii shaqaalaha aad taqaanid, sababtoo ah,

waxey kuu sheegaan dadyow gaas waxa lagaa rabo iyo waxa aad qabaneysid, Magaca Cilmi baaristaa aad sameynaysid waxaa lagu magacaabaa (Bre interview) macna heedu waa wareysi yar oo aad kusoo diyaar garow beysid, marka wareysigaan wuxuu kaa saacidaa wax badan oo hadhaw kuu keeni lahaa caqabad, hasa ahaatee, wareysiga wuxuu u baahan yahay qibrad iyo waayo aragnimo, taasina waa midda kaliya loogu guuleysto wareysiyada gaadmada, balse qofkii aan heysanin khibrad ama aan isku diyaarinin, shaqo diyaar uma' aha qofkaas, maaxa yeelay wax walbo diyaar garow ayey u baahan tahay, tusaale: kawaran hadii aad dhahdo Cunto ayaan rabaa gurigana waan jiifanaa, jawabtu: waa maya.

Maxaad ku liidataa?

Aqriste: su'aashaan waa mid adag waliba Qatar leh, marka qofka ku wareysanayo waa in aad siiso wax uu ku qanci karo Balse mar walbo jawaabta aad bixineyso waa in ay noqota mid ku saleysan wax la xiriira shaqada, hadaba hadey tahay jawaabtu mid la xiriirta shaqada waa in aad wax ka ogaata waxa la xiriira shaqada waana ku waan.

1: waxaad ugu jawaabi aniga waxaan ku liitaa in aan gareneynin waxa idin degsan dhanka sharciga iyo qorshaha shaqada.

2: Aniga ma shaqeyn karo wax ka badan 10 saacadood

3: Ha dhihin sidaan: aniga waxaan ahay qof ku liita arimaha Talo wadaaga, ha dhihin aniga waxaan ahay qof caajisloow ama soo daahis badan ,iyo aan ka aqoonin wax badan shaqadaan, maxaa yeelay loo shaqeeyaha waxaas makaa doonayo balse waxaa larabaa in aad ku saleyso shey aan wax kaa dhibeynin oo waliba keenayo qanac sanaan qofka ku wareysanayo.

Aqriste: Hana dhihin aniga waan hurda badnahay, maxaa yeelay loo shaqeeyaha waxaas ma doonayo wuxuu rabaa wax la xiriirta shaqada oo aan adiga wax kuu dhibeynin, sidoo kale, mar walbo waxaad muu jisaa kalsooni marka ad hadleyso.

Maxaad ku awood badan tahay?

Hagaag: dadka shaqa raadiska ah waa in ay iska fiiriyaan su'aashaan aadka u qatarta badan, maxaa yeelay su'aashaan dad baa si kale u fahmay kadibna shaqadooda ayey ku waayeen, hadaba hadii saas lagu dhaho maxaa kula quman in aad ugu jawaabtid ama mudan su;aashaan si hadhaw ay kaa caawiso markii lagu weydiiyo, jawaabtuna waa ku waan:

1: aniga waxaan ku awood leeyahay in aan idin gaarsiiyo hadafka ama hiigsiga ay fila neyso shirkada ama ha'yada

2: aniga waaxan ahay qof firfircoon oo la dhaqmi karo bulshada aan la shaqeynayo

3: waxaan ahay qof dulqaad badan

4: aniga waxaan waayo aragnimo u leeyahay in aan gaarsiiyo dadka, waxa ay aamin santahay shirkada ama ha'yada.

Hadaba aqriste: mar walbo ha is bar bar dhigin qofka kula tartamaayo, macnaha waxaa weeya in aad dhihin aniga sideedaba waxaan kaga fiicanahay dadka ila tartamaayo dulqaadka,hool karnimada iyo la macaamilka dadka, ina adeer taasi waa mid laga fiican yahay waayo waxaa laguu maleeynaa qof digteetar ship oo asaga isla jacel in uu leeyahay astaamaha uu asaga isku tilmaamayo, ugu danbeyn (taxadir lahow walal)

Maxaad tiigsani 2da sano ee soo socoto?

Aqriste: su’aashaan jawaabteeda waa mid aad ay u fiiriyaan dadka wareysiga qaada, maxaa yeelay qofka ay qaadanayaan waxey rabaan mid wax ku soo kor dhin karo in uu ahaado,

Hagaag: jawaabtu: qof walbo oo bani’aadan ah waxaa u degsan hadaf, hadafkuna waxaa loo qeybiyaa mid dhaw iyo mid fog, marka hadafku waa qorsho mal awaal ah oo larabo in uu hir galo, hadaba midka wareysiga laga qaadaayo, waa in uu sheegga hamigiisa, wallow ay suurta gelin hadafkaas, waayo qofka la wareysanaayo waa in uu noqdo qof hal abuur leh, marka hadaf walbo waa lagaa raa, taasi waxa cadeen u ah, 4 tii saxaabi oo ag fadhiistay kacbada, afartaan sadax wey isla dhasheen midna waa gooni, mid walbo wax buu sheegay wixiisana wuu gaaray, 4 taan saxaabi waxey kala ahaa yeen.

1: C/lahi binu zubeyr: wuxuu damcay in uu maamula dhulka loo yaqaana ardul xijaaz wuuna gaaray hamigiisa

2: muscab binu zubeyr: wuxuu hankiisu gaaray in uu maamula dhulkii loo yaqaaney ciraaqeyn, waxeyna kala yihiin: 1: kuufa 2: Basro.

3: curwatu binu zubeyr: curwa waa mid ka duwan saxaabadaan meesha ku kulantay, maxaa yeelay hankiisu wuxuu gaaray mid ku saleysan aakhiro, wuxuu asagana hangiisu gaaray in uu noqdo aqoon yahay oo diinta aad u yaqaano, waliba ku camal fala diinta islaamka, ilaaheyna wuu gaar siiyey hankiisi.

4: cabdul malik binu marwaan: wuxuu hankiisu gaaray in uu maamula oo milkiyo ardada oo dhan, sidoo kale cabdul malik hankiisu wuxuu ahaa mid fog oona ka badan hamiga muscab iyo C/lahi, Aqriste, ninkaan waa ninkii la yaqaaney aan lasoo koobi Karin sheekadiisa, maxaa yeelay wuxuu ahaa nin aad iyo aad xilliga uu madaxweynaha ahaa dad badan oo saxaabatu rasuuli laahi la dilay,

waxaa kamid ah dadka caanka ahaa oo la dilay xiligiisa balse uu dilay gudoomiyaha gobalka xijaaz, waxaana lagu magacaabi jirey ninkaas xajaaj binu yuusuf, hadaba magaca saxaabiga waa C/laahi binu zubeyr oo sixun loo dilay, qaar kalena oo saxaabada ka tirsan ayaa aad loo dilay cajiib, gunaanud iyo gabagabo

waxaad mar walbo tiigsato waad gaari, hadii aad guul dareeysato inta hiigsigaada lagu guda jiro waa calaamadii guusha, maxaa yeelay waxaa jirtay maah maah oo caanbaxday oo ingiriiz ah oo dhaheysay(guul darada waxey ku tusisaa guusha)

Maxaad awoodaa shaqada wax ka baxsan?

Aqriste: jawaabtu, Aniga waxaan jeclahay in aan qabto wax walbo oo lagu horumarinaa kambaniga, hadee noqota fikir, xoog iyo maskax, marka aan tagaayo shaqada waxaan jeclahay in aan qabto howsha xafiiskeeda lagu horumarinaayo, sidoo kale waxaan aad u rabaa in aan ka bixiyo mishaarkeeda wax yaalaha yar yar oo lagu horumarinaa xafiiskeeyga , maxaa yeelay hadii aan horumariyo xafiiskeyga waa anigoo horumariyey kambaniga oo idil, hasa ahaatee, awooda xirfadeed ee aan rabo oona ka baxsan shaqada la i gula soo heshiiyey waxaa ka mid ah:

1: Qof u baahan caawi maad, tusaale: shaqaala ayaa xanuunsaday, marka waxaa lagaa rabaa in aad buuxisa booskaas,

2: Saacadihii lagula soo heshiiyey maalinta wey dhamaatay, balse, Xafiiskaada dad baa u baahan in aad u shaqeyso.

3: In aad suubiso xayeysiin kambaniga aad u shaqeyso

4: In aad keenta fikrada lagu horumarinaayo kambanigaada.

5: In aan keeno xirfado lagu horumarinaayo shaqaalaha, Sidoo kale Dhib iyo dheef in aan u halgama kambanigeyga.

Maxaa talo oo aad noo reebaysaa?

Dhamaadka wareysiga, weydii su’aal, ugu yaraan hal su'aal. Tani waxa ay muujinaysaa in aad xiiso u leedahay shaqada iyo shirkada.

Ha su'aalin wax ku saabsan mushaar (bixin) ama fasax. su'aalahan Waxaad weydiin kartaa ka dib, markii aad hesho shaqo.

Sidoo kale: u mahad celi qofka ku wareysanaayo, waliba u isticmaal erayaal soo jiidasho leh, hanoqota mid keenaysa kal gaceyl ama shaqsi ahaan tiisa , sida wacan uu wareysiga kaa qaaday, mar walbo isku day in aad u mahad celiso qof walbo oo wareysi kaa qaadayo, ugu dambeyn markii aad tageyso salaam, waliba qoor qooreyso, taasi waa mid keenaysa isku soo dhawaansho iyo shaqada oo laguu fasaxo,

hadaba waxaa lagaa rabaa in aad noqota qof miisaan leh oona og erayada aad ku dhawaaqeyso, waxaa lagu ogaaday cilmi baaris in aad ku kasban karto qofka ku wareysanaayo hadal macaan, taasina waa mida ay qabto diinteena suuban, hagaag: Aqriste: aduunyadaan waxaa la isku dhaafay waa hadal wanaag, maxaa yeelay (NNNKH) wuxuu yiri hadalka wanaagsan waa sadaqo, marka diinteena suuban wax walbo ay dhaheyso micno ayaa ku jira, marka waxaa lagaa rabaa in aad dhaqan geliso arin taas.

Maxaad ka rabtaa shaqadaan?

Waxaan rabaa shaqadaan in aan gaarsiiyo shirkada hadafka ay tiigsaneyso, maa daama aniga aan ahay qof qibrad u leh shaqadaan, sidoo kale waxaan aad u aqaanaa ka dhabeynta hiigsiga shirkadaha ama kambaniyada, maxaa yeelay waxaan aad ugu mashquulay mudada aan wax baranayey in aan ka dhabeeyo wax walbo shirkada ay damac san tahay tusaale:

hadii aan ka soo qaado aniga mar walbo waxaa ii yaali jiray qorsho maalinle, usbuucle,bille,iyo mid sanadle, hadaba waxaan xaqiijiyey hadafka ii dagsanaa marka shaqada sidaas ayaan u rabaa in aan u qabto, hagaag: jawaabahaan ha bixinin saaxib.

1: aniga waxaan ka rabaa in aan helo cunto

2: in aan kaafiyo nolosha qoyskeyga

3: in aan helo lacag

4: in aan ka baxo gaajada

5: in aan helo qibrad waayo aragnimo ku dheehan

6: in aan la dhaqmo bulsho kala duwan

7: in aan barto shirkada sida ay u shaqeyso.

Maxaad ka ogtahay xog ku saabsan shirkadaan?

Aqriste: su'aashaan waa mid muhiim kuu ah, maskax daada waa in aad i amaahisaa, hagaag: jawaabtu: ugu horeen ku mahdi eeba oo ku u suurta geliyey kadib, waxaad ugu jawaabi sida tan. shirkadiinu waa mid la'aas aasay sanada 1997 bisha abril maalin arbaco ah, sidoo kale waxey ka kooban tahay ama ay leedahay 8 laamood iyo hal xarun,

waxay kaloo lee dahay hadaf kaas oo ay ugu horumartay shirkadaha kale oo dalka ku yaala, hasa ahaatee, shirkadiina waa mida keliya aan tiigsan jiray in aan u shaqeeyo, waayo waa shirkad u shaqeyso shacabka, waliba ka dam qato xiliyada dhibaatada jirto, marka shirkadiina waa mida keliya shacabku ay aamineen, shirkadiinu waa mida soo saarta wax soo saar wanaagsan,

sidoo kale waa mida keliya taariiqda xusi doonta, Aqriiste, hadalkaan waa tusaale, balse wax walbo sidaan ayaad ka dhigi, calaa shahaan sida aan u cabiri ayaad u isticmaali, hagaag: hadii aad tahay qof la wareysanaayo waa in aad soo ogaata shirkada ama ha'yada waxa ay tahay, kana ogoow shaqada booska la soo dhigay, tusaale sida tan.



Maxaad qabataa waqtiyada fasaxa?

Bal eeg hanaanka loo maro ama wadiiqada looga jawaabo su'aashan, jawaabtu: aniga waxaan qabtaa wax yaalaha lagu horumariyo nafteyda, hadee noqoto cilmiga laba diisa qeybood, aartis iyo saynin, sidoo kale wax walbo oo u keeni karo nafteyda faraxsanaan ayaan qabtaa,

Fasaxu: marka uu imaado qof walbo shaqo ayuu qabtaa, tusaale: gabadha guriga ayey ka shaqeysaa, wiilkana wuxuu kaalmeeyaa waalidiintiisa, hadaba qoraha buuga tusaalooyin badan ayuu ku xusay buugiisa, balse adiga waxaa lagaa rabaa mida aad is dhihi karto waa macquul in aad la kaashato caqliga uu eeba ku siiyey, marka hadii saas aad suubiso waxaad ku guuleysani su'aashaan jawaabteeda.



Jagadaad u tartameyso
Aqoon intee ayaad u leedahay?

Aqriste: waxaad uga jawaabi midaan qibrad shaqo iyo waayo aragnimo ku dheehan: aniga waxaan ahay qof qibrad u leh shaqadaan oona u keeni karo shirkada guul la taaban karo, ha noqoto mid macmiil cusub iyo ganacsata, tusaale: shirkada hadey tahay shirkad soo saarto joodariga ama ninaca, waxaad dhihi, aniga waxaan keenaa macmiil cusub kuna soo xiraa shirkadeyda, balse hadii shirkada ay tahay mid wax..

dhoofiso waxaad dhihi, aniga waxaan kusoo xiraa shirkadeyda ganacsata cusub oo wax ka gadata, kuwaas oo wax ka dhoofiya dunida aan maanta joogno, si kastaba ha noqotee, mar walbo waxa ad ku hadleyso waa in aad ogaato mid laguu qorayo in ay tahay, hadaba hadii saas ay tahay waa in aad isla socotaa Aqriste: marka aan qoray oraah daan waxaan soo xasuustey ninka fadhiya masjidka xareed agtiisa oo miisaanka dadka lagu cabiro haayo, oo dhahaa inaad isla soconin waxaa ka wanaagsan in aad is la socoto, hagaag: wax walbo waxaad weydiin dadka galey wareysi shaqo ama ka shaqeeya meelaha wareysiga lagu qaado, sida xafiiska shaqada iyo shaqaalaha, maaxa yeelay waxaad ka faa'idi wax badan oon ku sheegin meeshaan ama soo qaado buuga shaqada iyo shaqaalaha, si aad wax uga fahanto arimaha shaqaalaha u yaalo dalkeena ama aduun yadaan casriga la jooga .

Maxey tahay awooda xirfadeed aad lee dahay?

Aqriste: awooda xirfadaha aad leedahay waa in aad ku qancisaa wareystaha shaqada, taas oo keeni karto in aad ku hanato shaqada aad ku haminey say, hadaba waxaa lagaa rabaa in aad is xara keyso, hadal kaada micno u yeeshid, waayo hadal macaan oo soo jiidasho leh waa mida keliya ee lagugu dooran karo, hasa yeeshee jawaabtu: aniga waxaan ahay qof bartay cilmiga siyaasada/xiriirka caalamka,

mar walbana, waxaan ku hamin jiray in aan noqdo qof ka dhabeeya wax barasha uu baranaayo, maxaa yeelay qofka waxaa qiimo u yeela waa aqoonta, aqoontuna waa mida badasho bulshada oo idil, hagaag: Sidoo kale aniga waxaan xirfad aqoon u leeyahay dhanka Computerka, maxaa yeelay waxa lagu shaqeeya dunida waa tignoolajiyada casriga, taas oo fudadeysay in ay ka dhigto aduunka oo idil hal guri, cajiib!,

waxaan heystaa dibloomooyin badan sida, dibloma international relationship, Dibloma hardware iyo network, dibloma political science, diploma, general math, diploma statics, dibloma public relatios, waxaana koosaar u heystaa cilmiga aan soo bartay siminaris, kuwaas oo suugo u noqday aqoonteeda, maxaa yeelay qof wata baakad iyo koosaar, iyo qof wata baakad qalalan aan waxbo la jirin, aqriste yaa la qaadanaa, marka jawaabtu: waa xagaada.

Mushaar meeqa ayaad rabtaa in ad ku shaqeyso?

Mar walbo adiga ayaa lagu tijaabinaa, inta ay la dhan tahay dhuuntaada, balse aqoon yahanku wax walbo wuu fahmaa jawaabtu: waxaad dhihi adigoo u dhoola cadeynaya waliba in dhahaada aad qaabilineyso, aniga waxaan qaadanaa shirkada ayey u degsan tahay (siyaasadaas) hadii aan heysto shahaadada dugsiga sare qalin bay ku duugtay shirkada, hadii aan heysto dibloomo ama digrii, baajiloor iyo mastar

shirkadaan waxey u dajisay nadaam, marka marabo in aan idin weydiiyo arimahaas, sabab too ah shirkada taas xal bay ka gaartay, hadaba, wareystuhu waxaan kula dar daarmaa in uu ka hadlin arintaas, waxaa laga yaabaa midkoo gaajo heysay ama shaqa la'aan in badan heysay hadal hadii la dhaho ma is celin karo,

laga yaabaa midka ku wareysanaya lacag uu san qaadanin in aad sheegato, taasina waa guul daro, wax walbo waa in aad ogaataa in ta aad gelin wareysiga, aduun yadaan waxaaba la keenay wax kuu fududeynaa cilmiga aad rabto bal adeegso waxa lagaa rabo, sidoo kale cilmi baaristu waa midda la isku dhaafay, maxaa yeelay cilmiga sidiisaba waa mid ku dhisan wax baaris iyo fikir, caqli ka shaqeysiin iyo dadaal.

Maxaad sameysaa markii ay ku qabato wal wal? (istarees)

Jawaabteedu waa mid muhiim ah, waxaad ugu jawaabi, aniga marka ay iqabato murugo waxaan aad uga fikiraa waxa aan ku baabi'iya murugadaas, waayo murugadu waa mid laga dhaxli karo cuduro xun, hasa ahaatee waxaan suubiyaa in aan qabeesto , tukado salad iyo in aan isku buufiyo wax yaalaha keeni karo udgoonka, kadib waxaan aqristaa kalaamka eebe subxanah watacalaa, kadib murugadu wey iga baabi'I, marka

Aqriste: dadka isku mid ma'aha, qof walbo murugadu wax buu ku daaweeyaa, dad baa ku daaweeya murugadu waxa keenay in ay dilaan, halka dadka qaarkiis ay biyo qaboow is ka mariyaan wajiga, balse Murugadu waa mid ka timaado dhanka Dhibaatada iyo rafaadka,wal bahaarka ruuxa ku habsato iwm.

Marka hadii lagu weydiiyo su'aashaan waxaad la kaashani jawaabahaan iyo caqliga uu eebe kusiiyey, maadamaa dadka kala caqli badan yihiin, kala maana ey yihiin, hadaba wax yaalahaas iska xifdi, hadii kale maanta maalin aan aheyn ayey ku qabsani, walaalka/walaasha muslimka ahow, marka qoraha buuga wuxuu kula dar daar mayaa in aad guuleysato, waliba noqoto mid anfaca dadkiisa, dalkiisa iyo diintiisa aamiin,aamiin.

Noo sheeg caqabadaha waqtiga shaqada lugu jiro?

Caqabaduhu waa mid badan, hasa ahaatee su'ashan jawaabteedu waxaad ku cabirtaa maskaxda uu eebe ku siiyey, balse caqabadaha lagu weydiiyey waa mid ku saleysan waxa laxiriira shaqada iyo nafsadaada, hagaag: waxaad uga jawaabi caqabadaha ila soo gud boonaado inta shaqada aan ku jiro waxaa kamid ah, arimaha ku saabsan qoyska, iyo nafsadeeda,

Sidoo kale, hadii aan tusaale kaa siiyo caqabadaha shaqada la xiriira, 1: aniga oo shaqeynaya, hadii maamulaha uu I dhaho shaqadaadu waa liidataa, marka nafsadeyda aad bay caqabad ugu tahay, maxaa yeelay anigoo shaqada aad iyo aad ayaa ugu fir fircoona ahay, hadii arintaas aan maqlo waxey ii keeeni kartaa niyad jab aad u weyn.

2: In la iga duud siiyo wixii xaqqa u lahaa.

3: Fasax in aan helin.

Mudane/Marwo, kuwaan waa tusaale, balse ku darso waxa aad heyso, maxaa yeelay, waxaa la yiraahdaa caqliga kaa maqan wuxuu ku jiraa walaalkaa.

Maxaad sameysaa markii aad dareento farxad?

Aqriste: su'aashaan jawaabteeda waxey ku xiran tahay caqliga uu eebe ku siiyey iyo waayo aragnimadaada, hagaag: jawaabtu: qof walbo wax buu sameeyaa, maxaa yeelay dadka isku mid ma'aha, balse anaga dad muslimiin ayaan nahnay diinteenu waxey noo jideysay qofka markuu farxo in uu la dhaco sujuud la gu maga caabo, sujuudul shukri, oo mac naheedu tahay in allah ku shukriyo qofka waxa uu ilaah u siiyey, taasina waa mida muujineyso in Allah aad adoon u tahay,

sababtoo ah adoonimadu waa mida eebe uu ku cadeeyey aayadiisa, alla wuxuu yiri, insi iyo jinni maana abuurin illaa in ay I caabudaan ma ogee, marka aduunyadaan wax kale looma keenin insi iyo jinni, si kastaba ha noqotee dadka qaar ayaa siyaabo kala duwan u sameeya farxada,waxeyna bixiyaan hadiyado balse, aan kasoo qaado wax yaalaha qaar ay dadka u badan yihiin: 1: Hadiyad bixintu waa mida ay isticmaalan somalidu marka ay farxad qabato

2: Sadaqo: dad qaar wax bey sadaqeystaan marka ay farxaan maxaa yeelay, sadaqadu waa midda celisa balaayada soo socoto ama aaqira ayaad ugu bad baadi naarta, hadaba waxa la bixiyo qofka markuu farxo waxey ku xiran tahay geyiga uu joogo, marka uu qofka uu farxo waxa uu suubiyo.

Habeenkii meeqa saac ayaad hurudaa?

Aqriste: Su'aashaan waa su'aal la isku gaado oo waliba keeni karto shaqadaada in aad ku weysid, waayo qofka ku wareysanaayo, wuxuu tijaabinaa qof wanaagsan in aad tahay iyo in aad aheyn, hagaag: jawaabtu sidaan ka dhig mudane/marwo.

Aniga waxaan seexdaa habeenkii cishaha marka aan tugto kadib waxaan soo kacaa tobanka saac oo habeenimo maxaa yeelay, nafteyda waxey u baahan tahay nasiino fiicaan, sidoo kale waxey iga saacidi in aan maalintii sifiican ugu shaqeeyo dadka shaqada aan u qabto, marka aduun yadaan aad arkeyso waxa la isku dhaafay waa nasiino, inta uu qofku kaa nasiino wanaagsan yahay ayuu kaa caafimaad wanaagsan yahay, warkaas waxaa laga soo wariyey,

qolada caafimaadka aduunka, Hadaba waxaa lagu weydiinayaa marka aad soo kacdo waxa aad sameyso,waa in aad dhahdo waan soo weyseestaa kadib salaad ayaan tukadaa, kadib quraan ayaan aqrisadaa, kadib waxaan aad u aqriyaa cilmiga aan soo bartay, hanoqdaan kuwa xifdin iga baahan, ama kuwa aqrin iga baahan, si kastaba ha noqotee waxaa lagaa rabaa in aad dhihin habeenkii waxaan seexdaa 5/6/7/8 saac, taasi shaqadaada waad ku weyni, maaxaa yeelay qof xiligaas seexday goormuu soo kacaa, sidoo kale goormuu shaqada imaanaa, marka su'aalahaas ayaa la is weydiiyaa, mudanayaal iyo marwooyin.

Bal wax nooga sheeg waxa ku qoran C.V gaada?

Aqrise: wax yaalaha la isku gaado ayey kamid tahay iska jir Hagaag: maalin maal maha kamid ah shaqo waxaa aaday nin saaxiibkey kadib waxaa la weydii wax ku qoran siifiigiisa, balse nasiib daro wuu is daba mariyey taariiqda uu kasoo qalin jabiyey jaamacada iyo dugsiga sare, sidoo kale siifiigiisa wuxuu kunoqday mid aan asaga keenin waa layaabka dunida, hadaba Aqriste: waa in aad xifdisaa waxa ku qoran siifiigaada,

hanoqota maalin/bisha/sanadka ad gashay dugsiga sare ama jaamacada iyo dhameyn tooda, marka waa in aad ku baraatigeysaa waxa ku qoran siifiigaada hadii kale, waad ku guul dareysani, waxaana noqoni qof tacabkiisa lagu daalay sidoo kale waxaana kasoo bixi maah maahdii xoogaada wuxuu noqonaa xoog doofaar lagu eryey, hadaba mudane/marwo wixii aad soo baratay waa in aad beri gacantaada ku shumisaa, maxaa yeelay mar walbo waxaa kugu xisaabtamaya walaashaa ama aabaha iyo hooyo macaan oo dhaheysa mar walbo mar kii uu wiilkeena soo qalin jabiya ayaan gacan teena shumineynaa

Aqriste: mar walbo is xisaabi inta beri indhaha taagi laheyd, bal dhageyso heesta macaan nin lagu seexdoo ha seexan, adigoo saas lagaaga fikiraa kawaran hadii aad noqota mid cida lacagta ka qaado aan wax usoo kor dhinin wlaahi waa yaaab, walaalka muslimkoow waalidiintada guul usoo hooy.

CV.gaada meeqa ayuu ka koban yahay?

- **Magaca iyo macluumaadyada xiriirka** – Cinwaanka, emaylka, lambarka telefoonka
- **Arji shaqo** – Liisgaree goobahaadi hore ee shaqo, Sheeg sidoo kale waqtiga uu socday xiriirka shaqadu. Sawir ka bixi shaqooyinkaadi iyo xirfadaha aad shaqada ka baratay.
- **Waxbarashada** – Utax shahaadooyinkaada sida ay u kala horeeyay, ugu horeysii tii ugu dambesay. Ku dar magaca shahaadada, magaca barnaamijka waxbarashada, magaca machadka iyo waqtiga qalinjebinta.
- **Koorasyada** – Ku tax cinwaan u gaar ah hoostiisa koorasyada afka engilsh iyo koorasyada kale ee aad soo dhigatay.
- **Awood-xirfadeed kale** – Aqoonta afka, aqoonta international relationship, Political science, Public administration, management, Computer science iwm.
- **Daabacaadyo ama bandhigyo shaqeedyo kale** – Waxaad ku dari kartaa haddii aad dooneyso daabacaadyadaada ama bandhigyadaada shaqo.
- **xilal kalsooniyeedyo** – Waxaad sidoo kale soo bandhigi kartaa waxyaabaha aad xiiseyso.

- Waxaad billowga hore ee CV'ga ku dari kartaa soo-koobis ama muuqaal aad ku sawireyso taariikhdaada iyo aqoontaada gaarka ah adigoo isticmaalaya dhor jumladood. Waxaad sheegi kartaa hiigsiyadaada codsigaada shaqo iyo awood-xirfadeedkaada gaarka ah. Sawirkaada ayaa sidoo kale ku dari kartaa codsiga.

  Aqriste: siiviiga asaga wuxuu aad diirada saarayaa waxa aad soo baratay oo xirfad ah, iyo waayo aragnimada aad u leedahay shaqada aad codsaneyso, siifiiga waxaa kaloo lagu dari karaa mararka qaar taariiq nolaleed kaada waa hadii loo baahan yahay arintaas, sidoo kale siifiigaada waxaad ku qori wax yaalihii sida mutadhawacnimo aad ugu shaqeysay

  bulshadaada si hadhow laguu doorta mudane/marwo. Maxaa yeelay shaqada waxaa lagu tixgiliyaa shaqsiga qibradiisa waayo aragnimo iyo mida uu bilaash ugu shaqey umada Hagaag: siifiigaada waa in uusan ka badanin labo beej oo kaliya, si ha dhaw uu nuxur uu ula haado dadka aqrinayo, siifiiga sida looqoro waxaan ku qori doonaa buugeyga dhamaadkiisa insha Allah.

Diyaar garowga wareysiga

Aqriste: waa in aad hubisaa meesha shaqada lagaaga wareysanaayo, sidoo kale waa in is weydiisaa su'aalo 10 daqiiqo ka hor, maxaa yeelay waxey kaa saacidi in aad ku guuleysato shaqadaada, marka waxaa lagaaga baa han yahay xog dheeraad in aad soo heshid oo ku saabsan wareysiga, hanoqota dhanka su'aalaha, dharka laxiranaa hadaad wiil tahay ama gabadh, hadaba waxaa lagaa rabaa in aad tagtid

Goobta 15 daqiiqo ka hor si aad ugu horeeysa dadka wareysiga lala gala, taasina waxey kaa saacidi in luguugu tix geliya imaadi taan kaada waqtiga hore, marka waxaad ka baari kartaa wareysiyada googlaha iyo muuqaalo badan oo la duubey oona ku jira yuutuubka, marka waxaa lagaa rabaa in aad raadisa xog badan kuna saabsan meesha lagaa wareysanaya,

marka walaala yaal dadka isku kuliyad ma'aha, qof walbo kuliyad ayuu kasoo baxay, marka waxaa laga rabaa meelaha wareysiga ugu daran fildhigiisa waa in uu iska fiiriyaa, sidoo kale waxaa la ga yaabaa in la gaa weydiiyo su'aalo waxa aad baratay, marka waa in aad fahan san tahay waxa aad bara tay, hadii beri su'aal lagaa weydiiyo, dad badan ayaa la arkay waxa ay barteen aan wax bo ka fahan saneyn waa cajiib, marka dadka la wareysanaayo waa in ay ku soo shaqeeyaan waxa ay barteen si hadhow ay ogu jawaaban waxa ay barteen.

Bilaabista shaqada cusub

Aqriste: mar walbo waxaa lagaa rabaa inta aad gelin shaqada waa in aad gasho heshiis qoraal ah, warqada loo yaqaano memorandham of agriiment waa in aad gasho, marka warqada inta aad saxiixin waxa ku qoran aqri, waliba isku day in aad fahanto, hadaba hadii saas lagu dhahay waa in aad barataa marka hore warqadaha heshiis yada lagu galo , marka hadii kale waxaad noqoni mid aan wax fahan saneyn,

sidoo kale waa in aad barataa proposal writing, maxaa yeelay wax yaalahaas waxey kaa saacidaan in aad ogaata wax walbo marka aad tahay shaqa raadis ama shaqo doon, hagaag, shaqada cusub aad heshay waa in aad suubisaa arimo dhoor.

1: Waa in aad noqotaa qof daacad ah, waayo, marka aad bilaabeysid shaqo cub, waxaa la tijaabinaa daacad nimadaada, waxaa la dhigaa xafiis kaada lacago doolar ah.

2: Noqo qof ilaaliya waqtiga shaqada lasoo galaayo iyo kabixitaan keeda.

3: Noqo qof u keenayo shirkada uu ka shaqeynayo horumar.

Sida looga bad baado wareysiga

Wax yaalaha bad baadin karo wareysiga waa kuwa badan, Aqriste: hada ka hor waxaa dhacday wiil soomaaliyeed oo ka duceysan jirey waalidkiisa oo waayeelo ah, mar walbana ku mashquul Sanaa xanaaneen tooda, marka habeenkii la seexanaa wuxuu damin jiray nalka, wuxuuna soo xiri jiray albaabka, tubadana wuu xiri jirey, cajiib! Wiilkuna waa mid wax bartay oo aqoon yahan oo guri joog ah,

maalin maal maha kamid ah ayaa shaqo la soo dhajiyey, shaqaduna waa ha'yad, marka uu maqley wiilka duceysane qabe wuu baxay imtixaanka ayuu galay kadib wuxuu noqday dadka ku soo baxay imtixaanka, kadib waxaa lagu casuumay asaga iyo inta soo baxday wareysi, kadib saacadii wareysiga inta aan la gaarin ayuu ka soo harumaray kadib wuxuu arkay koronto iska shidan iyo marooxad,

Kadib wuu damiyey, isla goobtii wuxuu arkey tubba daadaneyso wuu xiray, hagaag: markii lasoo gaaray wareysiga asaga waxaa la dhahay goormee noo soo shaqa tageysaa, wuu la yaabay, war aniga maxaa? Maad iga qaadiin wareysi, kadib ayaa loo sheegay wax qabadkii fiicnaa uu qabtay, waxaana duubaay duceysane kaamirada qarsoon,

Walaal ka duceyso waalidkaa, eyaga ayaa kuu hiilinaa insha Allah.

Wareysiga shaqada waa dhankee?

Waxaa is weydiin mudan wareysiga dhankee ayaa lagaa wareysanaayaa, jawaabtu waa mid fudud, hasa yeeshee waxey ku xiran tahay waxa aad baratay oo intaasoo sano jaamacad oogu jirtay, tusaale: hadii aad baratey aytii, waxaa lagu weydiinaa kombuyuutarkaan shid ama dami, iska jir kombuyuutarka iska baro labadiisa qeybood, softa ware iyo hardware, marka kombuyuutarkana waa labo qeybood

laab toob iyo diski toob, waxaa lagu dhihi karaa diski toobkan shid, Hagaag: waxaa lagu dhihi karaa sistamkaan maxaa ka maqan, waxaana laga yaabaa in ay ka bixiyaan power supply ama hard diska, ha bixinin jawaab, bal waxaad dhahdaa adigoo is xarakeynaya kashwiito ii keena bal aan fura sistamka ama laabtoobka,sidoo kale waxaa lagu dhihi karaa waxaan rabaa in aan u baxo magaalada jigjiga, kombuyuuterkeedana waa diski toob, lamana qaadan karo kawaran, jawaabtu:

Hard diskaha ayaad labixi, markii aad tagto jigjiga kombuyuuter kale ayaad gashani, aqriste: su'aal walbo waa wixii aad soo baratay iyo u kuur gelid su'aalaha kugu imaan karo, bal maxey yihiin su'aalihii hore, oo tusaale: meeqa saac ayaad hurudaa habenkii iwm, kuwas waa su'aalo guud oo qof walbo oo wareysi galaayo uyaalaani, ha moogaanin su'aalahaas iwm.

Wareysiyada shaqada somaliya

Maalinta aad dhameyso waxbarashada heerka 1 aad waxa la soo fiirinaayo waa adiga, maadaamo aad noqotay qof jaamici ah, wax bartay, laguna bixiyey lacag badan iyo fikir badan, si kastaba ha noqotee, wareysiyada shaqada somalida ayaa noqday mid musuq maasuq ku lug leh, qabyaaladu somalidu ayaa sii kor dheysa maalinba maalinta ka danbeysa, haatan waxa lagu qiyaasay heerka digriiga in uu maraya is qaraabeysi, jufo jufo,

iyo xildhiban ma wadataa, cakawye, dhalin yartii waxbaraty dalkana ubaxiisa ahaa ayaa maanta shaqo la'aan iska ah, taasina waa mid aan gacan teena ku keyn sanay, balse waxa waa yahaan soo baxay dad baa wareysi laga qaadaa, kii lakeeni lahaa shaqadana waa diyaar san yahay, kuwaan wareysiga galaayana waa magac u yaal, waxeyna ka rabaan shaqaala badan ayaan , maanta imtixaan ka qaadnay, cajiib! Dhalinta somaliyeed waxaan kula dardaarmi lahaa in ay abuurtaan shaqo, maxaa yeelay waxa ay barteen meel hadii lala fadhiista waxaa ka imaanaa, amni daro, sababtoo ah aqoontu wax walbo ayey keeni, sidoo kale fesbuug live la soo gala, waxaa keenayo shaqo la'aan, taasina waa mugdiga noloshaada, marka dhalinta maanta malaha hal abuur, kaliya waxey lee yihiin sida wax loogu caayo baraha bulshada iwm.

Shaqooyinka caalamka daafihiisa waa mid ku saleysan aqoon keliya, waayo waa mida keliya ka dhigtay dowlad horumartay, tusaale: mareekan waxaa laguugu tix galinaa aqoonta aad lee dahay iyo qibradaada, balse somaliya waxa laguugu tix gelinaa xildhibaan iyo nabadoon afar ku jeeble, hasa ahaatee somalidu marka ay tagto qurbaha waxaad arki dhibaatada ay ku nool yihiin, somalidu qurbaha sey u badan yihiin

waa qaxooti, micnaha qaxooti waa tuugsi dadban, lamana oga, marka waxaad arki qof dalkiisa ceynaayo oo ceyr qaato, aana rabin in uu dalkiisa bad baadiya, marka hadii aan rabno in aan la jeen qaadno dunida horumartay waxaa nagala rabaa in aan allah u toobad keeno kadib aan is cafino, kadib aan u hugaan sano madexdeena sharafta leh, ha noqdaan kuwa hada jooga iyo kuwi hore,u gu danbeyn, hadii aad rabto in aad hesho wareysi shaqo aan ku dheeh neyn qabyaalad iyo nin jeclaysi,

waa in aad dalkaada wax kusoo kor dhisaa, hanoqota maal gashi, hal abuur ganacsi, iwm, talo wadaag: ha iska daayan dhalinyarada isticmaalka badan aaladaha la iskula xiriiro oo aan laga baraneynin aqoon, taasi waa dib u dhac, waayahan la soo darisey dhalintii dalka lagu badali lahaa, cajab!

Shaqo raadin

Sidaan ognahay dhibaatada shaqo la'aanta heyso dhalinyarada aqoonyahanada waa mid sii kordheysa maalin ba maalinta ka danbeysa, marka waxaan idin iftiiminaa hanaanka shaqo loo helo ama loo raadiyo, hagaag: marka hore waxaad iska dhiseysaa aqoontaada iyo wixii la xiriira, sidoo kale marka aad ku jirta jaamacadaada waxaad raadisaa shaqo si bilaash ah loogu shaqeynayo, marka aad dhameyso jaamacaada

waxaad helaysaa shaqo, kaasi waa qodob, qodobka labaad, waa in aad raadisaa shaqo ama wareegtaa magaalada, ha jiifanin, hana caajisin, waad heli, Aqristaha qaaliga ahow, waxaa la'arkay waayahaan qof jaamacad ka baxay, oo guriga jiifa oona kamid ah, dadka lagu magacaabo hooyo canjeero isii, marka walal waxaa la rabaa sida aad wax ku heli laheyd ayaa laga fikiraa,

Si kastaba ha noqotee, adiga ayaa samey san karo shaqo abuur, maxaa yeelay aawi wixi aad baratay, miyey ku baraneynin wax soo saar ama wax hindisid, cajiib! Waayahaan waxaa la arkay aqoon yahan lamid ah kartoon, ama aan diyaar u aheyn in uu aqoontiisa maasha, marka aniga waxaan aamin sanahay qof wax bartay in uu san waayi Karin shaqo, maxaa yeelay waxa uu bartay ayaa saas sheegaysa , hadaba aqoon yahanow waxaa lagaa rabaa in aad la imaada hal abuur ganacsi.

Shuruudaha wareysiga shaqada

Aqriste: mar walbo waxaad xakameysaa inta lagu guda jiro wareysiga shaqada qodobadaan soo socdo.

1: Codkaada: Codku dheeraantiisu waa mid aan habooneyn, waayo, waxaa lagaaga baahan yahay waa in aad ka dhigtaa codkaada dadka ku wareysanaya mid ay ku maqlaan kaliya, hadii kale waxaad ku weyn doontaa shaqada aad u ordeysa.

2: Jirkaada: hadii jirkaadu uu bato dhaq dhaqaaqiisa waxaa lumisaa kalsoonidaada, hadii kalsooni kaa lunto waxaad dareemi cabsi, taas oo keeni karto in aad hadli weyso, marka la wareystaha waxaa looga baahan yahay in uu joojiya ama xakameeya dhaq dhaqaaqa jirkiisa.

3: Xakameey ha dhihin waxaad dhahday ma maqlin, marka aad su'aal lagu weydiiyo aadna maqlin waxaad ugu jawaabi hab cilmiyeysan, waxaad u isticmaali, mudane kuma fahmin, mudane su'aasha jawaabteeda si aan u falanqeeyo bal ku soo celi, mudane suaasha sidaan uga bixiya macluumaad badan ku soo celi.

Meeshi aad kasoo tagtay
wax isku dhac ah miyaa ooga soo tagtay ?

Haa dabcan: waxaa jirto nadaam ay shirkadu ku horumaraynin in ay ku dhaqaaqaan madaxda shirkada, taas oo keeni karto isku dhac, marka aniga aan rabo in aan horumariya shirkada ama ha'yada, waxaa markiiba ila soo food noqoneysa caqabado ka yimaado dhanka madaxda sare, ayagoo mar walbo rabin, in aan horumariya shirkada waayo, soomaalidu waxey ku maah maahdaa sac ninkiisa seenta oga fadhiya

waxbo kama qaban kartid, marka mudane, caqabado noocaas ayaa jirtay, balse aniga wax caqabad oo aan gaarsiiyey majirto, maxaa yeelay aniga mar walbo shirkada waxaan ula dhaqmi jiray qof asaga iska leh oo kale, waayo shirkada hantideeda ogu weyn waa shaqaalaha, hadii shaqaalaha si daacad ah u shaqeynin, shirkadaas wax usuurta galaayo majirto, marka waxaan aad iyo aad ugu han weynahay in aan ula dhaqmo dad walbo aan u shaqeynayo sidaas oo kale, hagaag: Aqriste: hadii saas aad ugu jawaabtid, su'aashaas waxaa aad iyo aad kula farxaa wareystaha shaqada, maxaa yeelay waxaad u muujisay hadalo macaan, oo wax ku ool leh.

Aqriste: su'aasha jaawaabteeda waa fikradeyda, balse adiga sida ay kula tahay bal u eeg.

deegaankee jeceshahay in aad ku shaqeyso?

Aqriste: waxaad ugu jawaabi sida tan.

Waxaan jeclahay in aan ku shaqeeyo deegaan fiican, nabad gelyo, leh, iyo aan la heyn wax dhibaato, maxaa yeelay qofka shaqeynaayo waxaa u haboon in uu ku shaqeeyo deegaan laga helay arimihii aan soo xusay, hadii la waayo arimahaas, waxaa lu meysa in uu shaqaalaha sidii ku habooneyd in uu u shaqeeyo, Si kastaba ha noqotee waxaa loo baahan yahay in la helo deegaan nadiif ah, aan la heyn wax dhibaato, deegaanka fiican waa midka keliya horumariya shirkadaha, tusaale, shirkadda hadii ay ku yaasha goob nabdoon, waxaa kobcaya daqliqa kuu soo xaroonayo, hagaag, waxaa muhiim ah in la helo dhoor astaamo, si loo helo kabac dhaqaale, waxaa kamid ah.

1: Deegaan la jeen qaadi karo shirkada iyo shaqaalaha.

2: Deegaan ay ka jirto hannaan iyo maamul suuban.

3: Deegaan ay ku nool yihiin bulsho kala gadisan, sababtoo ah deegaan kaas waxaad kasoo barani, sida ay u dhaqmaan bulshadaas kala duwan.

Noo cee maamulidaada?

Su'aashaan waa su'aal adag, inta badan waana la is weydiiyaa, marka waxaad ugu jawaabi, aniga waxaan maamulaa kooxdeyda, marka hadii xaalad soo darisata waan xaliyaa, sidoo kale waxaan dareemaa wax walbo ay u baahan yihiin dadka aan maamulaayo, waxaa kaloo u qabtaa siminaaris, taas oo aqoontooda kabeysa, waxaan kaloo sameeya isla xisaabtan, oo shaqo walbo la qabto, sida loo qabtay iyo waxa dhiman,

waxaa kaloo bilaabaa marka aan imaado shaqada in aan xaliya dhibaatooyinka jira, waxaan mar walbo isku dayaa in aan dhiira galiyo mid walbo oo shaqaalaha, waxaana ka dhigaa siyaasadeyda mid furan, oo qof walbo fikir ka dhiiban karo, Waxaan kaloo suubiyaa qof walbo markuu soo hoyo guul, waxaan ogu jawaabaa dhowr nooc, taas oo suurta gelin karto in aan noqdo qof maamula wanaagsan, waxaana kamid ah ku waas, 1: in aan u salaaxo madaxa aan dhaho waxaad tahay qofka aaan ku tashto shirkadeeda, waayo la'aantaa shaqadu ma her galeyso, ama waxaa sameyn shaqaalaha marka la shiraayo ayaad sheegi magaciisa, taasi waa mid u keeni karto dhiira gelin.

2: in aan siiyo guno

3: in aan dalacsiiyo

4: in aan keeyo xafiis cusub, balse isku mishaar ah.

Hadii aad noqon laheyd xayawaan kee jeclaan la heyd in aad noqoto?

Su’aashaan waa mid lugu tijaabinaayo inta caqligaadu uu la dhan yahay, waayo loo shaqeeyaha wuxuu aad u jecelyahay in uu helo qof maskax leh, marka waxaad ugu jawaabi isla markaas, aniga waxaan jeclaan lahaa in aan noqdo libaax, Aqristaha qaaliga ahow, libaaxu waa midka ugu caqliga badan, uguna geesi badan, marka adiga waa in aad iska dhigtaa libaax oo kale, waayo loo shaqeeyaha wuu dhiira gelini hadalkaada, hadaba ha dhihin aniga, miyaa xayawaan noqonaa, ha gelin dood, balse abaar jawaabta sida ugu macquulsan, hana isticmaalin hadaladaan.

1: aniga waxaan jeclaan lahaa in aan noqdo yaan yuur iwm.

2: aniga sideedaba waxaan jeclahay waraabe.

3: aniga waxaan jeclahay in aan noqdo maroodi.

Aqristaha qaaliga ahow: mar walbo hadalkaada ku aadi wax cajabinaayo dadka ku wareysanaayo, waliba maskaxdooda ka fog, ayna cabiri karin hadalkaada, maxaa yeelay taasi waa guushaada , guushana waxey ku tusi, inta ay la dhan tahay aqoontaada iyo waayo arag nimadaada, Cajab!

Qorsho majiraa ay leeyihiin caruurtaada?

Aqriste: su'aalaha qaar waxaa lagu tijaabinaa, inta ay la dhan tahay maskax daada, marka waxaa lagaa rabaa in aad iska fiirisa waxa aad dhaheyso, waxaad ugu jawaabi su'aashaan sida tan, waxaa jiro qorsho ay leeyihiin caruur teyda, waxaana kamid ah qorsha haas,

1: In ay helaan waxbarasho tayo leh, iyo mustaqbal fiican.

2: waxaa jiro jadwal sheegaya maalin walbo waxa ay khabanaan.

3: waxaa jirto in lasiiiyo fursad ay ku hadli karaan,

4: In ay helaan bar baarin wanaagsan.

5: In ey helaan goob ay u dalxiis tagaan, taas oo kabcineyso garaad kooda.

6:s dhammaan caruurteyda waxaa lama huraan ah in ay noqdaan kuwa wanaagsan hab dhaqan kooda.

7: In ay noqdaan hogaamiyaasha / hal abuurada dunida.

Maxaad dareentaa shaqada habeenka ?

Aqristaha qaaliga ahow: su'aashaan waxaad ugu jawaabi, waxa aad dareenta shaqada habeenka laqabto, hagaag, hadii tusaale ku siiyo, aniga waxaan dareemaa culeys badan, ha noqota mid shaqo, iyo mid caafimaad, hasa yeeshee waxaa kamid ah.

1: Caafimaadka uma fiicno, shaqada habeenka laqabto, waayo, waa waqtiga jiifka ee lanasanaayo, waa hadii aad joogta somaliya.

2: Amni xumi, waayo, qoraaga markuu sheeko qoraya waxa uu ku bees gareeyaa, goobta uu jooga, hadaba marka aad joogta aduunyada kale, si kala u dhig su'aashaan.

3:: Shaqada habeenka la qabto, waxaa ka fiican shaqada maalinta la qabto, sababtoo ah, allah subxanah watacalaa, ayaa xikmadiisa ku dareersatay in maalinta la shaqeeyo, kadibna habeenka la jiifto,

Ugu danbeyn, mudane/marwo, jawaabtaan waa tusaale, balse adiga waxaa lagaa rabaa in aad la kaashato qibradaada.

Shaqadaan tababbar noocee aad ka rajeyneysaa?

Waxaan rajeynaa in aan helo tababar, kaas oo ii horseedaya in aan la imaado waxqabad wanaagsan, sidoo kale, tababarka la siinayo shaqaalaha, waxey ku xiran tahay, shahaadada uu heysto shaqaalaha, hadii shaqaalahu uu heysto, shahaado digrii, waxa uu u baahan yahay tababar, dhanka shirkada, balse haduu heysto shahaado mastar ama bii hejdhii, waxa lasiinayo waa tababbar hormar ah, ma la gula dhaqmaayo, sida wax bilow ah, maxaa yeelay qofkaan waa qof leh qibrad shaqo, marka waxa uu u baahan yahay keliya, aqoontiisa in la kobciyo, hagaag, tababarka waxa uu noqon karaa habab kala duwan, waxaa kamid ah.

1: In la siiyo qofka tababar kaligiis.

2: Ama koox ka tirsan shaqaalaha iyo asaga in loo qabto.

Hadaba tababarku muhiimadiisu waxaa kamid ah.

1: In uu kobco wax soo saarka shaqaalaha.

2: In uu yaraado qasaaraha.

3: In sara loo qaado tayada shaqaalaha.

Noo sheeg shaqada aad ku riyoon jirtay mustaqbalka?

Walaal: mar walbo waxa la fiirinaa waa garaadka uu eeba kusiiyey, marka wax walbo lagu weydiiyo waxaa lagaa rabaa in aad u fiirsato, hagaag, mar walbo riyada mustaqbal kaada waxaad ku xiri waxa aad baratay si ha dhaw luguu qaato, waxaad ugu jawaabi sida tan.

1: aniga waxaan mar walbo ku riyooni jiray anigoo shaqaala ka noqday Ha'yadiina, maxaa yeelay ha'yadiinu waa ha'yad i cajabi say,

2: waxaan aad iyo aad ku raja weynaa in aan barto xiriirka caalamiga, waliba aan ku shaqeysto.

3: shaqada riyada mustaq bal keyga waa in ay noqoto mid anfacda nolosheyda iyo bulshadeyda,

4: In aan noqdo hal abuurka qarnigaan.

5: Bari in ay ii gasho CVgeyga ha'yad hebel ayuu u shaqeyn jiray.

Shaqadaan cusub maxaad karabtaa?

Bal u fiirso, mudane/marwo, shaqadaan cusub maxaad ka dooni waa su'aal inta badan umada lagu kadiyo, hasa ahaatee, waxaa laga wadaa awal meelo ayaad ka shaqeyn jirtay, marka shaqadaan cusub oo hadda, aad dooneyso, maxaad ka rabtaa, hagaag: waxaad ugu jawaabi sida tan.

1: aniga waxaan jeclahay in aan noqdo qof qibrad shaqo leh, marka waxa, aan u doonayo taas ayaa kamid ah.

2: waxaan ku hamiyaa in aan la kulmo ama lasoo shaqeeyo bulsho kala gadisan, dhaqan ahaan iyo diin ahaan.

3: habeen iyo maalinba waxaan jeclaan jiray in la I dhaho hebal, shirkadaas ayuu ka shaqeeyaa.

4: In aan ka faaideysto qibradaha shaqo aad leedihiin iyo midka aan leeyahay.

Ugu danbeyn, aqristaha qaaliga ahow, Isku day in aad ka dhigato ku waan tusaale.

Gabagabo wareysi shaqo

Walaal: wareysiga marka uu kuu dhamaado, has weydiinin loo shaqeeyaha mudada aad usoo noqoni, maxaa yeelay, dadka adiga kula tartamaayo waxaa laga qaadanaa midka ugu fiican, oona buuxiya shirkada xeerarka u yaalay, hadaba, waxaa lagaa rabaa in aad is dajiso, mudada laguu Waco, aado, hagaag, dhamaadka wareysiga waxa kaliya lagu hadlo waa talo celin, maxaa yeelay talo celinta waa laga maar maan, waxa uu kamid yahay waxa soo jiidanaa, loo shaqeeyaha, waxaad isku tax luu jisaa in aad ku hadasho, hadalo macaan, oo qalbiga saameen ku leh, waxaa kamid ah hadalada saameenta ku leh loo shaqeeyaha.

1: aad ayaad u mahadsan tahay sida wacan aad igu qaabishay.

2: mana arkin waligey shirkad noocaan oo kale.

3: waxaan iloobi Karin soo jiidashada aad ii samey seeyn.

4: waxaan rajeynaa in aan kamid noqdo, shaqaalaha shirkadiina.

5: Kadib waxaad la imaan salaam qoora qooreysi.

Maxaa kaa dhigi karo in aad u shaqeyso si adag?

Waxaa iga dhigi karo, in la i siiyo mushaar igu filan, in aan helo sinnaan, iyo maamul wanaag, sidoo kale, in la i abaal mariyo, marka aan qabto shaqo wanaagsan, ugu yaraan la idhaho, mahadsanid, waayo, aadanuhu waxa ay ku shaqeeyaan waa dhiira gelin keliya, iyo sinnnaan, hagaag, hadii aan la helin sinnaan waxaa lumaya shaqo wanaagii, iyo waxaa ka muuqata xayawaan kii ka shiray xanuunkii ku dhacay,

hadaba, dulucda sheekadaas, waxa weeya marka aysan cadaalad jirin waxaa xukunka qabto kuwa taagta daran, waa halka ay soomaalidu ka tiraahdo, miskiin baa misko la fuula leh. Hagaag, wax yaalo badan ayaa shaqaalaha ka dhigi karo in aad u shaqeeyo, waxaa kamid ah.

1: In la siiyo shaqaalaha guno yar uu ku xisaabtamayo.

2: In la dareensiiyo shaqaalaha daacadnimo

3: In shaqaalaha mishaar uu ku qanco lasiiyo.

Maxaa dhiira geliya naftaada?

Hadii aad i weydiisay su'aashaan, mudane, waxaa iga dhigi karo in aan u shaqeeyo si adag, qodobadaan soo socdo.

1: hadii la isiiyo mushaar igu filan.

2: in ay tiraahdo shirkada sanad walbo waxaan abaal marin siin doonaa dadka soo buuxiya shuruudahaas.

3: Markaan keeno wax horumarinaayo shirkada, in la i abaal mariyo, waliba la iga dhax sheega shirka gudaheyda.

4: waxaa dhiira geliya markaan arko in aan gaaray guusheyda.

5: markaan helo naag wanaagsan, igula dar daar meyso, in aan ka jiifanin himaladeyda.

6: dad nimadeeda waxey kamid tahay wax yaalaha dhiira geliya nafteeda.

7: In uu ila dhaqmo loo shaqeeyaha si wanaagsan

Hadaba, aqrise, waxaa lagaa rabaa in aad ka dhigto, wax yaalaha dhiira geliya naftaada, wax quseeyo, shirkada aad rabto, inaad u shaqeyso, Mahadsanid.

Wax nooga sheeg dabeecadaada?

Hadii aan idiin bidhaamiyo dabeecadeyda, waxaan ahay qof la dhaqmo bulshada uu la shaqeeya, iskuna dayo dadka in uu kasbada, hasa ahaatee, aniga waxaan ahay qof jacel nabada, sidoo kale, waxaan maslaxa dhigaa dad yowga kale, marka walal, waxaad isku daydaa, adigoo is amaaneynin in aad sheegto, arimo la xiriira shaqada, sabab too ah, loo shaqeeyaha waxaa dhiira geliya arimo kobcinaayo shirkadiisa, hadaba mudane/marwo: waxaa muhiim ah in aad soo koobto warkaada, si uu micno u yeesho, hagaag, astaamaha dabeecadeyda waxaa kamid ah.

1: qo fir fircoon.

2: Qof dadka bad baadiyo.

3: Dulqaad badan.

4: Qof ixtiraam badan

5: Hool badan iyo hadal yar.

6: Deeqsi ah. (Gacmo Furan)

Meeqa ayaa kula dhalatay?

Aqristaha qaaliga, mar walbo waxaa la tijaabinaayaa, garaadkaada inta uu la egyahay, sidoo kale, su'aasha ceynkaan hora kama soo tuuraan dadka qaarkiis , balse adiga intaad aadin wareysiga is waydii, hagaag, tusaale, aniga, hadii isku bees gareeyo, waxaa ila dhalatay, 20 qof, 12 waa wiilal, inta kale, waa gabdho, hasa ahaatee, waxaa nool 18 qof, waxaa dhimatay 2 ruux, hadaba aqriste, waa tusaale kan meesha

ku qoran, marka waxaa lagaa rabaa in aad isla markiiba soo tufo carabkaada, su'aashaan, hagaag, loo shaqeeyaha sida ay u badan yihiin waxa ay isticmaalaan su'aalaha ceynkaan, maxaa yeelay waxa ay u baahan yihiin qof dhaayo leh, hadaba waxaa lagaa rabaa su'aalaha ceynkaan sidaad uga guuleysato sameey qodobo dhoor, waxaa kamid ah.

1: Isku day mar walbo in aad isku tax luujiso wax yaalaha kobciyo garaadka aadanaha.

2: La saaxiib dadka eeba uu siiyey garaadka.

3: kana baq Allah subxanah watacalaa.

Meeqa xaas ayaad guursan doontaa?

Aqriste: horay ayaan kusoo xusay, mar walbo, in la tijaabinaayo garaad kaada, hagaag, waxaad ogu jawaabi sida tan.

1: aniga waxaan guur sanaa mustaqbalka 4 naagood, kuwaas oo ilaahey ii baneey, sidoo kale, waxaan ka fikiraa hagaajinta mustaqbal kooda, ha noqota, tarbiyada, biilka, iyo waxbarashada, maxaa yeelay, Allah subxanah wata caalaa ayaa nagu waa jibiyey arintaas, hasa ahaatee, loo shaqeeyaha wuxu aad u tix geliyaa dadka aragtida dheer.

2: Waxaan ka shaqeyn lahaa in ay isla shaqeeyaan xaasaskeeda, waayo, isla shaqeynta waxey keeni in aan ku noolaado horumar iyo nolol heersare, tusaale, hada kahor imaam ayaa qudbadiisa bulshada cajab gelisay, marka waxaa la weydiiy sababta suurta gelisay arintaas, waxa uu ku jaawbi sida tan, aniga waxaan heystaa xaasas wanaagsan, tusaale kale, ogsoonow hadii aad aragto qof wanaagsan oo umada ay jecel yihiin, waxaa suurta gelisay xaas wanaagsan, hadaba aqriste isku day sidaad ugaarto hamigaada in aad guursato xaas wanaagsan.

Meeqa sano ayaad ku dhax jirtay waxbarshadaada?

Su’aashaan waa mid la guugu tijaabinaa inta garaad kaadu la dhan yahay, waayo loo shaqeeyaha wuxuu rabaa qof caqligiisu la socda waxa dhaafay, marka waxaad ku jawaabi sida tan.

1: aniga waxbarashada waxaan ku jiray 12/8/6 sano, waqtiga aan bilaabaay dugsiga hoose waxaan jiray 6 sano, waxaan u gudbay 4 sano kadib dugsiga dhaxe, marka saas ayaad u wadani, balse waxaad la socotaa taariiqda aad bilaaw day waxbarashada iyo waqtiga aad dhameysay, waayo, waxaa uu fiirinaa loo shaqeeyaha in aad dhameysatay waxbarashada iyo in kale, si kastaba ha noqotee, waxbarashadu waa mida qiima

kuu yeesha, mudane/marwo, waxbaro, gayigaaga ha barwaaqooba, dhulkaadana anfaca, waayo waxbarashadu waa mida horumarisa bulshada, una keenta ilbaxnimo, ku dheehan waayo aragnimo, marka waxaad mar walbo iska fiirisaa waxa kuu keeni karo caqabad, iyo dib dhac nolol, Aqristaha qaaliga ahow, su’aashaan aan kor kusoo xusay labo qodob ayaa ugu muhiimsan, in aad iska fiiriso, heerka aad joogta iyo bilwgii waxbarashada, hagaag: waxaan rajeynaa in aad guuleysan doonta, marna ha ka baqin guusha, guushuna waad hanan doontaa insha Allah.

Aduunyada maxaad kusoo kordhini?

Su’aashaan waa su’aal dhibbadan, kama jawaabo qof hami la heyn, waayo, garaadka ma soo qaban karo hankaas intaa la eg, hadaba aqriste, waxaad ogu jawaabi sida tan iyo wixii la halmaala ah.

1: waxaan kusoo kor dhinaa waxa aan bartay wax ka duwan.

2: iyo xikmado ku saabsan arimaha shaqada.

3: iyo fikrado lagu horumarinaayo arimaha shaqada.

4: iyo in la tayeeyo shaqaalaha shirkadaan.

5: iyo in la yiraahdo qof hebel shirkada uu hada uu ka shaqeeyo asaga ayaa u keenay kobac dhaqaale.

6: iyo in aan keeno ama dhiso shabakad isku xireyso shaqaalaha

7: iyo in aan sameeyo Goobo fagaara ka hadal ah, oo lagu ogaanayo shaqaalaha fiican.

8: in aan noqdo shaqaale iyo si bilaash in aan idinku noqdo suuq geyn.

Dhaqanka shaqada xafiiskaad jeceshahay waa kee?

Xafiiska aan jeclahay waa mid laga helay qodobadaan soo socdo .

1: Xafiis degan: calaa shahaan xafiisku waa in uu noqdo mid dagan, nadaamsan, jadwal leh iyo

2: Waa in xafiiska uu yaalo, wax walbo horumarinayo shirkada.

3:Waa in uu noqdo mid laga digtoo naaday caafimaadka goobta shaqada aan tagaayo.

4: Xafiisku waa in uu lahaadaa wax yaalaha aadanuhu u baahan yahay sida, mukeyf.

5: Waa in la isiiyo shaqooyinka qaaar madax banaani, waayo waxey suurta gelini horumar dhaqaale iyo wax soo saar badan.

6: Xafiiska dadka ila shaqeeyo waxaan jaclaan lahaa in ay noqdaan dad leh hal aragti iyo hal u jeedo, si loo gaaro himilada aaan tiigsaneyno.

Ugu dambeyn, kuwani waa tusaale, waxaad la kaashataa garaadkaada, maxaa yeelay oraah oraneyso baa jirtay, cilmiga baro lana kaasho garaad kaada.

Maxaa ku xiga wareysiga?

Wareyasigu wax yaabaha ku xiga waxaa kamid ah.

1: In aad siisoo mahad celin loo shaqeeyaha, maxaa yeelay mahad celintu waa midda keenta in aad hesho shaqadaan, si kastaba ha noqotee, aa danaha wuxuu aad u jecel yahay in la'amaano.

2: In laguu soo diro warqad casuumid ah, warqadaan waxey ka tarjumeysaa in aad hanatay shaqadaan.

3: iyo in laguu soo diro warqad celin ah , oo lagu dhaho noo keen war celin, maxaa yeelay war celintu waa midka kaliya waxa la isku siiyo, marka mudanayaal iyo marwooyin isku daya in aad bixisaan war celin.

4: Mararka qaar waxaa dhici karto, in lagu wareysto aan laguu yeerin, waayo shaqadaan awal waxaa u diyaar sanaa reer qansax mid ka soo jeeda, adigana waxaad ka soo jeeda reer qurac, si kastaba ha noqotee, lama saadaalin karo waxa ku xigaayo wareysiga kadib, balse waxaa sheegi karo keliya, loo shaqeeyaha, ugu dambeyn aqriste ,wax walbo tusaale ka dhigta, lana kaashada shaqada qibrada aad hey satiin(Guul shaqo)

Dadka adiga maxey kugu tilmaamaan?

Aqriste: waa su’aal la rabo in adiga laguugu ogaado, balse isku day in aad abaarto, waxa ay dadku kugu tilmaamaan, hagaag, waxaa kamid ah astaamaha la igu tilmaama.

1: Fur furnaan,

2: Qof dagan.

3: Hadal suge, waxaa laga wadaa qof dhageysanaa waxa loo sheegayo.

4: Wanaajiya, qofkii xumeeya iyo kii wanaajiya, si wanaagsan ula dhaqmo.

5: Alla ka cabsi.

6: Qof si fiican u shaqeysto.

7: Qof aamina waxa alla uu siiyey.

8: Qof leh asluub wanaag.

9: Qaboojiye dadka xanaaqa badan.

10: Qof nabadoon ah, ka dhaxeeyo bulshada.

Goor mee shaqadaan soo galaysaa?

Aqriste: su'aal walbo la kaasho garaadkaada, hadaba su'aalaha ceynkaan haku degdegin, hagaag, waxaad ogu jawaabi sida tan.

1: Shaqadaan waxaan soo galaa marka la i aqbalo

2: Marabi in aan ka hor dhaco go'aamada u yaala shirkada.

3: Marka aan ku guuleysto shaqadaan.

Hadaba mudane/marwo, waxaa lagaa rabaa in aad ka hor dhicin loo shaqeeyaha jawaabihiisa, ha Oran goormee shaqadaan soo galaa, waayo taasi waxey u fahmaan in aad dagdageyso, hagaag, Aqrise, waxa la soo ogaadey, qofka hadii loo daayo go'aamada masiiriga uu asaga leeyahay

Waxa uu kuu fahmaa qof lala shaqeyn karo in aad tahay, hana isku dayin in aad hadal ku celiso, sababtoo ah, waxaad ka fiirsataa dantaada, somalidu waxey ku maah maah day dantaada maqaar eey ayaa loogu seexdaa, marka isku day in aad kula hadasho, hadalo macaan oo soo jiidasho leh.

Shaqadaan intee kasoo heshay?

Sida aan ognahay, shaqadu waxaa la soo dhigaa ciwaanka shirkada ay leedahay, marka waxaad ugu jawaabi, aniga waxaan ka soo helay shaqadiina beejkiina kuna lifaaqan shaqo doon, hagaag, waxaa badanaa la fiiriyaa shaqada waxa la iska rabo iyo qofka loo baahan yahay, waayo hadii aad soo ablaay gareyso shaqada, waxaad ogaani, mar walbo in aad ku habooneyn, tusaale, waxaa loo baahnaa qof yaqaano xiriirka caalamka, hadaba waxaa soo codsani malaayiin badan,

maxaa yeelay, wadanka shaqo la'aan ayaa ka jirta, qof walbo waxa la weydiiyo, wuxuu ku jawaabayaa aad baan u aqaanaa shaqadaas, hadaba, waxaa muhiim ah, in uu codsado shaqadaan qof ka heysto shahaado sare, si kastaba ha noqotee, markii la rabo in loo Waco dadka soo codsaday shaqada, waxaa keliya loogu wacaa wareysiga shaqada dadka soo bartay shaqada la rabo, dadka kale warqadahooda waxaa lagu tirtiranaa gacmaha, marka waxaad isku daydaa inaad fiiriso booska banaan, iyo cidda loo rabo, ugu danbey walaal waxaa lagaa rabaa in aad taqaanto shaqada booska lasoo codsaday iyo qofka loo baahan yahay, waayo waxaa laga yaabaa in lagu weydiiyo su'aashaas.

Maxaad u gali wareysi?

Wareysigu waa kala saaraha shaqaalaha , maxaa yeelay wareysigu waa meesha laga ogaanaa shaqaalaha tayeysan, marka muhiimada wareysiga waxaa kamid ah.

1: in la keeno shaqaala tayeysan.

2: in la kala yareeyo dadka soo codsanaa shaqadaan.

3: Wareysigu waxa uu kaa caawinaayaa in aad keen sato shirkada shaqaalaha horumarin karo.

4: Wareysigu waa xulashada shaqaalaha soo codsanaayo shaqada, maxaa yeelay shaqaalaha soo codsanaayo jagada banaan waxa ay is kugu jiraan, shaqaalo liito iyo kuwa heersare.

5: Shirkada in ay noqoto mid ay bulshado ku xulato aqoon.

6: in shirkadu u baahan tahay dad ooga shaqeeya xarumaha cusub ay fureyso.

Ogu dambeyn, waxaan filayaa in aad heshay macluumaad badan, kuwaas oo fudu deen doona guusha wareysiga.

Dar daaran(Qoraaga Casrigaan)

Mudane/Marwo, waxaan idin kula dar daar mayaa Cabsida alle, waayo waa nala faray, qofka markuu waxbaranayo waxaa muhiim ah, in ay qalbigiisa ku jirto Alla ka cabsi, qof aan Allah ka baqeynin wax ma barto, waxaa tusinayo arintaas, hadalka sheyqa imaamu shaafici uu yiri, aqoontu waa iftiin, iftiinka alle kuma hanuuniya qof alla aan ka cabsaneynin, intaas kadib, sida aan ognahay, waqtiyadaan barbaarta (Dhalinyarada) shaqo ma helaan, waxaa ugu wacan diyaar sanaan aan jirin, bal isku day in lagu soo raadsado, lagu dhaho noo shaqeey, hadii aad rabto in lagu soo raad sado diirada sar qodobadaan.

1: Noqo qof wax aqriya.

2: Noqo qof wax qora.

3: Noqo qof daawado xikmadaha dhiira gelinta waxbarashada.


4: Noqo ruux tayeeya waxa uu bartay.

5: Noqo ruux sameeyo cilmi baaris, waayo cilmi baristu waxaad ku heli lacag, iyo magac

6: Noqo qof ku han weyn waxa uu rabo in uu gaaro.

Baro wax yaalo la xiriira Arimaha shaqada

Aqristayaal: waxaa muhiim ah, inaad ogaato wax yaabaha la xiriira waxa aad baraneyso, waayo, hadii kale waxaad noqon, ruux aan garaneynin meesha uu usocdo, hagaag, mudane/marwo, hadii tusaale ku siiyo, aniga oo qoraaga buugaan, waxaaan dhigtaa jaamacad, waxaan ka bartaa xiriirka caalamka, hadaba waxa la iga rabo waxaa kamid ah sida jaartigaan ku xusan.



Hadaba aqriste, ma’aha in aan iska indha tiro waxa la iga rabo.

Ogsoonow, waxa adi kusugayo dhmmaan bulshada soomaaliyeed iyo qaraabadaada, hadaba waxaa muhiim ah in aad isla socoto waxa lagaarabo, waayo waxaa habeen iyo maalin kugu fikiraayo ama xisaabta aad ugu jirtaa walaashaa ama hooyadaa, waxey mar walbana ku Han weyn yihiin in aad

Barito shaqeyn doonto, marka waxaa jirtay hees oraneysay, Nin lagu seexdoo ha seexan, hagaag, waxaa la yaab ah, qof dhan sidii loo soo korinaayey in lagu faa'idi waayo, hadaba walaal sidey kugu dhicin arintaas dadaal, dadaalaa wuu gaaraa, aqriste, waayadaan waxaa soo

Badatay dhalinyaro ka baxday jaamacad, aana leheyn xirfad shaqo, Cajaaib!!!

Hadaba sidee loogu badbaabaa? Waxaa loogu bad Baadaa in la helo dhalin yaro leh xirfad shaqo, kuwaas oo ka wacyi gelinaayo dhalinyarada, in ay la haadaan xirfado la xiriirto waxa ay baranaayaan, waxaana ku bogaadinaa dhalinta waxbaratay oo leh xirfad shaqo, in ay baraan dhalinta aan la heyn wax xirfad ah, ugu danbey Nolol wacan iyo Niyadsami.

Qorista Warqadda Codsiga shaqada

Warqad codsi

Taariiq:../……

Ku : Wazaarada arimaha dibada

Ka : Sayid Axmed Xaaji Maxamuud Aadan

Ujeedo : Codsi shaqo

Anigoo Ah Sayid Axmed Xaaji Maxamuud Aadan

Ahna Arday Soomaaliyeed Barta Kuliyada Cilmiga Siyaasada, gaar ahaan Xiriirka Caalamka, Waxaan Ka Codsanayaa Maamulka wazaarada arimaha dibadda.

In aan ka mid noqdo shaqaalaha Wazaarada arimaha dibadda , waxaan filayaa in aad ii ogolaan doontaan insha allah

Tel: : 061……..

Mahadsanidiin

Aqriste: warqadaha codsiga waxey la socdaan siifiigaada, warqadda codsiga aad suubineyso waxey ku xiran tahay waxa aad codsaneyso, qaar kamid ah codsiyada waxaa kamid a.

WARQAD CODSI

MAGAC:	Sayid Axmed
HOOYO:	Xabiibo cali
DHALASHADA	1997
G/ DHALASHADA:	Banaadir

TEL: 061……

UJEEDO: CODSI SHAQO

Anigoo ah Sayid axmed lehna macluumaadka sare waxaan ahay shaqo Doon waxaan maamulka sharafta leh ka Codsanayaa in aan ka mid noqdo shaqalaha waxaan ahay arday heer dhameystay dugsiga sare

Waxaan filayaa insha Allah in aad aqbali doontaan codsi geyga

Mahadsanidiin

Waa maxay qoraa?

Qoraagu waa laf dhabarka bulshada, hadii la rabo bulsho in ay jirto waxaa muhiim ah, in la helo qoraa, qoraagu wuxuu ka turjumi jiritaanka luqadiisa hooyo, aqriste waxaad ogaataa umad walbo dunidaan ku nool, waxa ay leedahay qoraa, sidoo kale, hadii larabo in la baabi'iyo bulsho, waxaa laga soo galaa sadex dhinac, 1: diintooda, 2: dhaqan kooda, 3: luqadooda.

Marka luqada ay bulsho leedahay , hadii la hor mariyo waxey ka dhigan tahay jiritaanka bulshada, hadaba aqriste, waa in aad diirada saarto, qorista buugaagta, maxaa yeelay, marka aad wax qorto bulshada waad ka duwan tahay, xitaa goob walbo, waxaad la kul meysaa dad ku jecel, tusaale, marka aad ilmo dhasho, waxaa la leeyahay, waa wareey ka leexda waa ilmihii qoraaga, hadaba aqriste, hadii saas laguu wanaajinaayo waa in aad noqotaa qoraa, faafiya luqadiisa hooyo, noqo mid kusoo kor dhiya bulshadiisa buugaag wax tar leh sida.

Buugaagta kobciya maskaxda aadanaha

Buugaagta dhiira gelinta nolosha.

Aqriste: buugaagta la qoro waa labo qeybood keliya.

1: Buug ka hadlaayo sheeko.

2: Buug ka hadlaayo aqoon.

Qoraaga ma dhintaa?

Qoraagu ma dhinto, waayo waxaa lagu xasuusanaa waxa uu qoray, waa hadey wanaag yihiin, waxuuna kamid yahay 3. da qof oo camal kooda aan go'aynin, 1: qofkii waqfo biyo

2: Qofkii dhalay cunug wanaagsan una duceynaya kaas ma go'aayo camalkiisa,

3: Qofkii ka tago aqoon lagu intifaacayo, kaas ma go'aayo camalkiisa, marka walaal, qofka qoraaga ee wax wanaagsan qora waxa uu soo galayaa qodobkaan ugu danbeeya, hagaag, waxaa kaloo cad xadiis kale, qofka markii loo wado qabriga dhammaan dadk wey ka soo noqonayaan, maalkiisa waa kasoo noqonayaa, kaliya waxaa la jira camalkiisa, ogsoonow,

Aqriste, hadii wax wanaag aad umadda ogu tagto, waxaad heli wanaag, ha noqota mid aduunyo iyo mid aaqiro, ugu danbeyn, waari meysidee wax ha kaaharaan, mudane/marwo balanteenu waa qorista buugaagta anfacaya bulshada soomaaliyeed, waxaan idinka codsanaa in aan isku duceyno.

Taariiq nolaleedka qoraaga

Aqriste: qoraaga buugga waxa uu ku dhashay dhulka soomaali galbeed, gaar ahaan gobalka liibaan, degmada dollow adow, qoraaga wuxuu dhashay sanadka 1997 , sidoo kale, waxa uu waxbarashadiisa aasaasiga ka bilaabay degmada dollow addow, waxa uu soo aaday sanadka markuu maraayey,

2013 dii magaalada muqdisho, haatan waxa uu dhigtaa jaamacad, waxa uu ka bartaa xiriirka caalamka, hasa ahaatee, qoraagu ma'aha waxa uu wax u qoraayo in uu noqdo qof caan ah, balse keliya barbaarinta barbaarta soo koreyso, waxaana aad muhiim u ah, in wax laqoro, waayo waxey ka turjumeysaa jiritaanka afkeena hooyo ee soomaali, si kastaba ha noqotee, taariiq nolaleedka qoraaga ayadoo kooban waa midda aan kusoo xusay kor, ugu dambeyn waxaan idin kula dar daar mayaa in wax laga faa'ideysto, waayo aduunyadaan waxaa loo joogaa in wax laka la faaideysto, majiro qof dhihi karo aniga wax iga aqoon badan majiro, maxaa yeelay taasi waxey ka hor imaan Allah hadal kiisa,

(Qof walbo oo leh aqoon waxaa ka sareeyo mid kale.)

Hibeyn buuggaan


Buugeega waxaan u hibeeyey, awoowgey Aadan looxow, Allaha u naxariistee, waxa uu geeriyooday awoowgey sagaashameeyadii, wuxuu ku aasan yahay magaalada dolow adow, waxaan ka codsanaa cid walbo oo aqrisa buugaan in ay u duceeyaan awoowgey Aadan, maxaa yeelay jiritaan keega ayuu sabab u noqday, waxaan filaa in aad iga aqbali doontiin codsigeega, hadaba aqriste, buugaan waa buug

miro dhal badan, hasa ahaatee ducada waxaa loo hibeeyey qoraaga awoowgiisa, sidoo kale, waxaan u hibeeyey bugaan, hooyadeey Xabiibo qaliiif xaaji Ibrahim, hooyo sabab ayey u noqotay jiritaankeeda, waxaan u hibeynaa buugaan, ayeeyadey, Cabdiyo dugow Nuur, iyo adeer Ibrahim adan looxow, dhammaan tood waxaan leeyahy ajarka iyo xasanaadka buugaan ka soo baxa adin kaa mudan in la idin siiyo, hadaba waxaan idin leeyahay guul ku noolaada iyo Allaha ka dhigo martiqaad kiina martiqaad Ahlu janna Aamiin . Aamiin. Aamiin.

Dhammaad

Waxaan mahad balaaran u celinayo Allah, oo ii fududeeyey iguna kaalmeey in aan soo saaro buug ay bulshadu u baahan tahay, Alla waxaan wey diisanaa qof kii toosiya waxa aan ha leeyey in uu Alla ceybtiisa qariya maalinta qiyaamaha la jooga, maxaa yeelay qof walbo oo qoraa ah, wax buu qaldaa, sababtoo ah, aadanuhu ma dhameystirna, waxaa tusinaayo arintaas, gabaygii ku yaalay kitaabka mulxatul icraab, waxaa ku qoran sida tan.

Hadii aad aragto ceyb, buuxi meeshaas, maxaa yeelay waxaa weynaaday allah subxanah, oo ceyb ka huf naaday, hadana saramay , Hagaag, waxaan kusoo gaba gabeynayaa buugeega saliga nabigeega suuban scs, iyo nabad galyada asxaabta radiyaalu canhum, waxaan ka maqneyn meeshaan, salaanta awliyada, iyo dadka wan wanaagsan, sidoo kale, salaanta Qoraayaasha soomaaliyeed gaar ahaan **Naadiga Maskax Shiil**


HAL ABUUR SAYID AXMED CAADIL

Daabacaadii 1 aad